

BARTAMAHA PRESTON

In la hubiyo mustaqbalka Suuqa Preston oo mustaqbal leh. Iyo abuuritaanka bulsho firfircoon, kala duwan oo iskuxiran.



Muddo 50 sano ah, Suuqa Preston wuxuu u adeegay bulshada deegaanka asagoo ah meel ay dadka deegaanku isugu yimaadaan dukaamaysigooda toddobaadlaha ah iyo inay la kulmaan asxaabtooda. Darebin City Council waxaa ka go'an inay hubiso sucadda gaarka ah ee suuqeena oo ah meel soo dhaweyn, wax-isdhaafsi iyo kala duwanaansho leh oo sii-jireya mustaqbalka.

Sababtoo ah xarunta oo ku taal bartamaha Preston, waxay u dhowyahay gaadiidka dadweynaha, adeegyada, tas-hiilaadka waxbarashada, shaqooyinka iyo goobaha bannaan. Taas macnaheedu waa in xarunta leedahay samaynta derisyada kala duwan oo iskuxiran - abuuritaanka kaas oo gacan ka geysanaya wax ka qabashada dhibaataada guri siinta ee deegaanka, iyo inuu bixiyo tas-hiilaadka bulshada oo cusub oo xiiso leh.

Xeerarka qorsheynta ee Xarunta 'Xarunta' waxaa dib u fiirinaya Hay'ada Qorsheynta Victoria (VPA), sida uu faray Wasiirka Qorsheynta. Iyada oo qayb ka ah hawlgalkan, VPA iyo Darebin Council waxay soo ururiyeen aragtida dadka deegaanka iyada oo loo marayo barnaamij ballaadhan ee ka-qaybgalinta bulshada ah. VPA-da ayaa lagu wadaa inay bixiso qorshe qaab-dhismeed oo qabyo ah dabayaaqada sanadkaan, kaas oo qeexi doona waxa xeerarka qorsheynta cusub ay ka koobnaan doonaan.

Ka hor siidaynta qorshahaas, Darebin City Council wuxuu adeegsaday jawaab-celinta bulshada iyo natiijooyinka ka soo baxay Daraasad Aqoonsiga Suuqa oo dhowaan la soo gabagabeeyey si loo soo saaro *Bartamaha Preston*, oo ah dukumenti doonaya inuu muujiyo rajooyinka 'dadka deeganka iyo ganacsatada' waxa ay ka qabaan mustaqbalka xarunta. Waxay si cad u dejineysaa waxa loo baahan yahay inay dhacaan si loo hubiyo in suuqa uu kusii kordhayo iyo in xarunta ballaaran uu yahay deegaan nool, amaan ah oo leh jawi waaraya.

Waxaan ugu yeeraynaa go'aan sameeyayaasha inay:

- **Qiimeeyaan** astaamaha u gaarka ah suuqa ee wadooyinka iyo meelaha lagu lugeeyo oo daboolan kuwaas oo u e'g goobaha dadweynaha, xeryaheeda, istooilliska iyo dukaamada yaryar oo qayb ka ah dib-u-horumarinta.
- **Taageeraan** ganacsatada ka hor, inta lagu guda jiro iyo kadib dib-u-horumarinta.
- **Abuuraan** goobaha bannaan oo cagaaran oo cusub oo la adeegsan karo si loogu muujiyo mabaadii'da waaritaanka xoogga badan, muujinta heer sarraaynta xagga naqshadeynta iyo hagaajinta muuqaalka, dareenka iyo amniga goobta.
- **Gaarsiiyaan** usinnaanta bulshada xarunta ayadoo loo marayo goobaha bulshada ee cusub, guryaha la awoodi karo, barnaamijyada bulshadeed, tas-hiilaadka iyo fursadaha shaqo.

Iyo, kahor wax kasta oo faai'dooyin ah oo dhici kara, waxaan rabnaa milkiilayaashu inay siiyaan ballanqaad qandaraas si ay ugu ilaashadaan isticmaalka suuqa ee goobta hadda.

Si aad wax badan u ogaato oo ku saabsan mustaqbalka Xarunta Suuqa Preston, waxaad heli kartaa ilo fara badan oo bixiya macluumaad luqadaha aan Ingiriisiga ahayn. Taasna waxaa ka mid ah:

- Ka-wicidda kooxdeena Adeegga Macaamiisha taleefanka 8470 8888 waqti kasta inta u dhexeysa 8.30subaxii-5.00 casarkii Isniinta ilaa Jimcaha
- Ka-wicidda khadka taleefanka ee luqadaha badan si aad ugula hadasho qof luqaddaada: (03) 8470 8470
- Email ahaan: mailbox@darebin.vic.gov.au
- Cinwaanka boostada: 274 Gower Street PRESTON VIC 3072
- TTY (Dhageysiga Maqal dhantaalanka): Wac 133 677 oo weydiiso 03 8470 8888
- La-hadal oo Dhageyso: Wac 1300 555 727 oo weydiiso 03 8470 8888
- Relayga Internetka: Ku xiran [National Relay Service - IP Relay](#) oo waydiiso 03 8470 8888
- Qalabka Dhegeysiga oo La-qaadi karo iyo Qalabka Dhegeysiga ee Shakhshi ahaaneed: Qalabkan waxaa la dhigay dhammaan xarumaha Adeegga Macaamiisha oo dhan.

CITY OF DAREBIN

274 Gower Street, Preston
PO Box 91, Preston, Vic 3072
T 8470 8888 F 8470 8877
E mailbox@darebin.vic.gov.au
darebin.vic.gov.au

 National Relay Service
relayservice.gov.au

If you are deaf, or have a hearing or speech impairment, contact us through the National Relay Service.

 Speak your language
T 8470 8470

العربية	Italiano	Soomaalii
繁體中文	Македонски	Español
Ελληνικά	नेपाली	اردو
हिंदी	ਪੰਜਾਬੀ	Tiếng Việt